Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Fedraalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 3-aad
Ducomentiga Kol.3-aad/Kul.14-aad/2013 **12/10/2013**

Kalfadiga 3-aad
Kulankiisa 14-aad, Sac.fur. 11:55gh-Sac.Xir. 01:50gd.
Guntinta:161
Ajendaha:

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Shaacin Kursi Banaan**
4. **Ansixinta warbixinta Guddiga Xeer-hoosaadka loo xilsaarey**

Shir-guddoomiye,Guddoomiye Ku-Xigeenka 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad.

Waxaa shirka furay Guddoomiye Ku-Xigeenka 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad, waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka, uuna akhriyay Xil. Sheekh shaacir. Guddoomiyaha wuxuu Sheegay in ay horyaaliin Afar Ajende ,wuxuu intaa ku daray in uu banaan yahay Kursi Baarlamaan uuna baneeyey Xil.General Muuse **C/llaahi Xasan**, Ciddii Buuxin lahaydna waxaa looga baahan yahay in ay buuxiso shuruudahii Xildhibaannimo.
wuxuuna soo jeediye in la ansixiyo ajendaha shirka , Xildibaanadana way ansixi-yeen. Kadib, waxaa la bilaabatey doodii Su'aal weydiinta Xildhibaanada waxaana ugu horeyn halkaa ka hadley:
Xil. Cabdi wuxuuna sheegay in waajibaadka horyaala ee aad u farabadan yihiin , wuxuu intaa ku daray in Guddoomiyaha Guddiyada Xilka laga qaadikaro.
XilC/llaahi Cumar Abshirow,wuxuu sheegay in Qod. 9-aad ,Xil-waayidda ,waxaa keenikara 23 **%** wuxuuna soo jeediyey in laga dhigo 30%
Qod.20-aad –wuxuu soo jeediyey in meesha laga saaro sababtoo ah ma aha qodob dastuuri ah . Wixii kale oo hawla ah in meesha lagu daro ayuu soo jeediyey.
Xil. Cusmaan Libaax .wuxuu soo jeediyey in Xil-waayidda Guddoonka laga dhigo 1/3.
Xil. Sareedo,waxay soo jeedisey Xil-waayidda Guddoonka in sidiisa loo daayo .Tar-tanka habhowrayaashana sidiisa loo daayo oo ah 50+1.
Xil. Saado Cali Warsame, waxay soo jeedisey in Qod. 9-aad sidiisa loo daayo Qod.25-aad ee Madax-weynaha in loo daayo siduu u qornaa.

Xil. Xagaafe.wuxuu soo jeediye in Guddoomiyaha ,Ku-Xigeenadiisa iyo Xoghayayaasha laga dhigo Sannad.Arinta Xil-waayadina Goddoonka In laga dhigo 50+1. Wuxuu kaloo soo jeediyey in aan la ansaxixnin Xeer-hoosaadka,hadaanan sidaa laga dhigin
Xil.C/llaahi Maxamed Ciise ,wuxuu soo jeediyey in haddii uu ka dhamaado Xildhibaanada Fasaxa, loo kordhiyo. In Habdawraha sidiisi loo daayo. In arinta Motionka laga dhigo (6) bilood ka soo wareegato.

Xil. Jamaal wuxuu soo jeediyay in arinta xil-waayidda sideeda loo daayo.Qod,5-aad arinta Hindise sharciyeedyadana laga dhigo 50+1.

Xil. Abdi Axmed Abti-doon, wuxuu soo jeediyay in xil-waayidda Guddoomiyaha iyo ku-xigeenadiisa sidoodii hore loo daayo.Qod.2-aad wuxuu soo jeediyay in aan la fududeynin oo laga dhigo 50+1
Xil. Sey Sey,Qod.9-aad wuxuu soo jeediyay in kooramka loo daayo sidiisa hore oo ahaa 184
Xil. Fanax,wuxuu sheegay in Qod.9-aad sidiisa loo daayo
Xil. Xeyd wuxuu soo jeediyay in Habdhowrayaasha iyo Guddoonka sidooda loo daayo.
Xil. Sheekh Adan Madoobe,wuxuu soo jeediyay in Qod.9-aad maadaama uu qodobkaasi uu qabo in kooramka uu noqdo 184.Xeer-hoosaadkana uu qabo 1/30 oo sidaasi loo daayo. Qod.26-aad sidiisa hore loo daayo 50+1 oo ah tirade guud ee Baarlamaanka.
Xil.Xeydar, wuxuu soo jeediyay in xilliga shaqo ka bixida laga dhigo 02:00 Duhurnimo. Qod,9-aad xil-waayidda Guddoomiyaha iyo ku-xigeenadiisa,waxaa mooshinka Xildhibaanada ka keeni kara laga dhigo 20 xubnood.
Xil. Xiis Muuse,wuxuu soojeediyay in xildhibaanada waxa ay isku raacaan inuu socod siiyGuddoonaka Qod.-aad Xil-waayidda Guddoonka in sidiisa loo daayo.
Xil. Yacquub wuxuu soo jeediyay in lays bar bardhigo soo jeedinta Guddiga Xeer-hoosaadka
Xil. Samaan wuxuu sheegay in Qod.12-aad ee xeer-hoosaadka, Xoghaya Guud iyo 2-diisa Kuxigeen uu sheegayo in tar tan loo galo.arinta maqnaashaha wuxuu soo jeediyay in marka hore la siiyo digniin,sida shaqaalaha oo kale aan loola macaamilin.
Xil. C/laahi Jaamac.wuxuu sheegay in Xoghayaha guud uu magacaabi karo Guddoomiyaha Baarlamaanka,wuxuu seken gareeyay Xil.samaan oo xoghayaha guud tar tan la galiyo.
Xil. C/qaadir Sii Sii wuxuu sheegay in Qod-2-aad maxkamada Dastuuriga inta laga dhisaayo ay shaqeeyneyso maxkamadda sare,wuxuu soo jeediyay in qodobkaan meesha laga saaro.Qod.9-aad wuxuu soo jeediyay in sidiisa loo daayo,Qod.78-aad in loo saxo qoraal ahaan,
Toosin: Xil. Xeyd, in Xeer-hoosaadka uu ka shaqeeyo Gurigaan kaliye ee banaanka shaqo uusan ku laheyn. Waa in laga saaro maxkamadda Dasruuriga ah.
Xil. C/xakin Cige Guuleed,wuxuu sheegay in waqtiga shirka furmaayo laga dhigo 10:00 aroornimo.
Xil. Jaamac wuxuu sheegay in Qod.42-aad ee Hindise Sharciyeedka lagu ansixiyo 50+1,

XIl. Afaraale, wuxuu soo jeediyay in Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenadiisa loo daayo sidii hore

Xil. Muuse Sheekh Cumar,wuxuu sheegay Qod 8-aad,Qod.9-aad iyo qod.10-aad fasaxa, wuxuu soo jeediyay in laraaciyo qodob daruuri ah,

Xil. Ciise Wehliye, wuxuu soo jeediyay in Guddiga Joogtada howshooda uu qabanayo meesha ah in lagu bedalo howsha waxaa qabanaayo Golaha shacabka.

Xil. Ibraahin Isaaq yarrow,Qod-6-aad Habdhowrayaasha in loo daayo sidiisa hore, Qod-9aad in sidiisa hore loo daayo,Qod-26aad Ajendha in laga dhigo Tirada Guud ee Baarlamaanka, liiskana in laga dhigo tirada guud ee Fadhiga.

Xil. Geeseey soo daahida in laga dhigo 3 maalmood qod,fasaxana laga dhigo 30 maamood,madaxa Guddiyadana wuxuu soo jeediyay in ay u shaqeeyaan sida loogu tala galay.

Xil. Mustaf Muqtar Guudow, wuxuu sheegay arinta xil-waayidda uu qabo sidiisa hore in loo daayo,arinta mooshinka ka keenista Xukuumadda wuxuu sheegay in laga dhigo in lasoo caliyo 6,bilood kadib.

Xil. Axmed Ruush, wuxuu sheegay in xeer-hoosaadka, uu qabo in isaga wax laga badalin oo sidiisa loo daayo.

Xil.Cusmaan Xaaji Ali, wuxuu soo jeediyay in codeynta laga dhigo 50+1, tirada guud ee Baarlamaanka,in Hindise sharciyeedyada lagu soo koobo akhrinta 2-aad

Xil. Shariif,wuxuu sheegay in xil-waayidda sidiisa loo daayo

Xil. Beekoos,wuxuu sheegay in codka lagu galiyo 50+1 tirada guud ee Baarlamaanka,wuxuu soo jeediyay wasiirkii la weydiiyo su'aal ee ka jawaabi waayo in xilka laga qaado.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in xildhibaanadii haray ee dooda ay doodooda sii wada doonaan barito,

Shir-guddoomiyaha Guddoomiye Ku/xigeenka 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad,wuxuu sheegay in shirka xiran yahay saacadda markey ahayd 01:50gd.